

# world relief®

Saaxiibbadayada qaaliga ahow,

Waxaa na soo gaadhay war xun kan oo ku saabsan amarka sare ee uu Madaxweyne Trump soo saaray ee ku aaddan qaxootiga. Haddii aad Maraykanka qaxootinimo ku timid, amarkiisu si toos ah adiga kuuma saamaynayo, oo aan ka ahayn haddii ay jiraan xubno qoyskaaga ah ama asxaab qaxootinimo loo aqoonsaday oo la filayey inay Maraykanka yimaadaan.

Maaddaama ay bulshada ka dhex jiraan warar badan oo kala duwan iyo ku-tiri-kuteen, waxaanu dooneynaa inaanu idin siino war cad oo ku saabsan sida uu amarkan Madaxweynuhu idinka iyo qoysaskiina u saamayn karo.

## **Waxa uu Amarkan Sare ee Madaxweyne Trump odhanayo:**

- Ma jiraan qaxooti cusub oo Maraykanka soo gelaya intii 120 maalmood ah ilaa inta ay dowladdu ka qiimeynayso arrimaheeda ammaanka la xidhiidha ee waddamada dibedda ku saabsan.
- Tirada qaxootiga ah ee sannadkan Maraykanka la dejinayo oo dhammi waxay noqon doontaa 50,000, ee ma noqon doonto 110,000.
- Madaxweyne Trump wuxuu si toos ah u joojiyey dib u dejinta qaxootiga Siiriyaanka ah, koley wakhtigan hadda la joogo; ma garanayno haddii ama marka uu Trump ama (Madaxweyne mustaqbalka la dooran doonaa) dib u bilaabi doono dib u dejinta.
- Wuxuu kaloo amarkani muddo 90 maalmood ah inay Maraykanka soo galaan ka mamnuucayaa dadka ka yimid waddamadan kala ah: Iiraan, Ciraaq, Suudaan, Siiriya, Liibiya, Soomaaliya, iyo Yaman. 90 maalmood kaddib, waxaa laga yaabaa in dadka qaarkood mamnuucidda laga qaado.
- Wakhti kamid ah 120-ka maalmood ee soo socda dhexdooda ayaa dowladda Maraykanku go'aansan doontaa inay joojiso inay Maraykanka dib u dejiso ama ay soo galaan qaxootiga liisto ah waddamo cusub oo la sheegi doono. Ma ogaan doonto kuwa ay waddamadaasi yihiin ilaa ay dowladdu ka sheegto.

## **Arrintani sidee u saamaynaysaa qaxootiga hadda Maraykanka jooga:**

- Qaxootiga hadda Maraykanka dhexdiisa jooga waa ammaan oo iyaga ma qabanayo sharcigan Ameerikaanka ah ee cusubi.
- Aqoonsiga qaxootinimo ma dhaco, laakiinse waxaanu qaxootiga oo dhan ku dhiirigelineynaa inay kaadhka cagaaran (*green card*) dalbadaan (markay sannad joogaan kaddib), oo dabadeedna dhalashada Maraykanka qaataan (markay 5 sanno joogaan kaddib).
- Dhammaan dadka ka yimid Ciraaq, Iiraan, Liibiya, Soomaaliya, Suudaan, Siiriya, iyo Yaman waa inaanay wakhtiga hadda lagu jiro dibedda u safrin, haddii aanay dhalashada Maraykanka haysan. Taladani waxay kaloo ku socotaa kuwa kaadhka cagaaran haysta (ee sida sharciga ah waddanka ku deggan). Dadka dhalashada waddamada kale haystaa ha ka fiirsadeen ka hor inta aanay waddanka dibeddiisa u safrin. La hadla oo xaalladdiina ka waraysta qof Wasaarradda Caddaaladda u shaqeeya ama qareen arrimaha soo galootiga qaabilsan.
- Haddii ay jiraan xubno qoyskaaga ah ama asxaab qaxooti ah oo doonaya inay Maraykanka yimaadaan, ha ka rajo dhigin inay yimaadaan. Laakiinse waa inaad diyaar u noqotaa war adag/xun ama inay taasi muddo dheer qaadato.

World Relief way sii wadi doontaa inay ka war hayso wixii is beddel ah ee cusub ee dowladdu samayso ee saamayn ku yeelanaya dib u dejinta qaxootiga. Bisha May, ayaanu idiin sheegi doonaa wixii war ah ee cusub ee ku saabsan qorshaha dib u furida qaxootiga iyo wixii is beddel ah ee lagu sameeyo liistada waddamada loo ogol yahay in dadkooda dib u dejin la siiyo.

Wax kastaaba mustaqbalka ha dheceene, annagu waxaanu sii wadaynaa inaanu qaxootiga iyo soo galootiga kale taageerno. Waanu idin jecellahay, oo waanu idin aaminsannahay, oo waxaanu idiin taageeri doonaa oo idiin ilaalin doonaa si kasta oo aanu awoodno.

World Relief